Refugee Rights Turkey

Mülteci Hakları Merkezi

ADEEGYADA DARYEELKA CAAFIMADKA
dadka doonay magan gelyada Turkiga

SU'ALLO IYO JAWAABO

XUQUUQDA QAXOOTIGA EE TURKIGA: LA TALINTA XAGA SHARCIGA IYO KAALMADA QAXOOTIG OO LACAG LA,AAN AH

Türkiye'de Uluslararası Koruma Arayan Kişiler İçin

SAĞLIK HİZMETLERİ

SOMALİCE

SORULAR & YANITLAR

Şubat 2016 Güncellemesi

Anigu waxaan doonayaa, ilaalinta caalamiga ah ee Turkiga, Xaq ma u leeyahay inaan helo adeegyada caafimadka ee bila lacagta ah?

Codsadaha ilaalinta caalamiga ah iyo ka Faa'idaystaha codsiga ilaalinta caalamiga ah, Kuwaas oo aan lahayn caymiska caafimad iyo kuwa aan haysan dhaqaale ay iska bixiyaan ayaa xaq u leh inay helaan adeegyo caafimaad oo lacag laa,an ah oo ay bixiyaan hay'adaha dawliga ah. Hadaba si aad u hesho xuquuqdada, Waxaa lagaaga baahan yahay inad ka diiwan geliso codsigaga ah ilaalinta caalamiga ah goobaha dawlada ama waa in lagu aqoonsaday ka faaidayste ilaalinta caalamiga ah.

Waa in lagu soo saara Kaadhka aqoonsiga ajaanibta , si aad u hesho adeegyo caafimad oo lacag la,aan ah oo ay bixiyaan hay,adaha dawliga ahi. Si aad u helsho xuquuqdaas, waxaa laagaga baahan yahay inaad iska diiwan geliso oo codsato ilaalinta caalamiga ah ama waa in lagu aqoonsaday ka faaidayste ilaalinta caalamiga ah.

Nambarka Kaadhka Aqoonsiga ee ajaanibta waxaa u muhim u yahay si lo xaqiijiyo xaq u laahanshaha adeegyada caafimaad ee lacag la,aanta ah iyado la raacayo nidamka ilaalinta caalamiga ah, Adiga iyo qoyska kula socodaba iyo xubnaha ka kooban tihin waxa la siinayaa Kaadhka Ilaalinta Caalamiga ah ka dib marka waraysi lagugula yeesho DGMM ee dawlada. Dukumentiyad waa bilaasho oo lacag ma ah, waxaan ku jiri doonta Nambarka Kaadhka Aqoonsiga kaas ka bilowda 99.

Marka lagu soo saaro kaadhaka Aqoonsiga ajaanibta, waxaad si buuxda u heli doontaa adeegyo cafimaad oo lacag la,aan ah oo ay bixiyaan hay,adaha dawladu.

Sidee baan u heli karaa adeegyada caafimadka?

Waxaad heli doonta daawayn bilow ah, adeegyo baxnaanineed ee xarumaha ugu horeeya ee caafimadka,goobo caafimad, xarumo caafimaad, xarumaha dhalmada iyo caruuraha iyo goobaha qorshaynta qoysaska iyo xarumaha lagu daaweeyo Bukaanka Tbda qaba, kuwas oo ah goobaha ugu horeeya ee caafimadka . Xarumahan caafimad aya sidoo kale bixiya Baaritaano,Talaallka xanuunada la kala qaado. Adeegyo takhasuus ee caruurta ah, da, yarta iyo weliba dhalmada iyo adeega qoysaska.

Sido kale waxaad si toos ah ula xiriiri karta, Adeegyada sare ee labad iyo sadexaaadba ee macahadyad caafimaadka.Cusbitalada dawlada waxay u kala baxaan cusbitaal sare sare iyo cusibitaalo cilmi baadhiseen iyo sida kale cubsitaal jamacadeed oo ah heerka sadeexad. Sido kale waxaa suuragal ah inad ka faaidaysto adeegyada caafimad ee ay bixiyaan cusbitalad cilmi baadhiseed iyo kuwa jamacadeedba iyadoo lagu soo gudbinayo. Tan aad bay muhiim u tahay

iyad lo fiiranayo xaladaha deg dega ah . lagama yaabo inad hesho adeegyad cusbitalaad cilmi baadhista iyo kuwa jamacadahaba hadi aan lagu soo gubdin

Isma diiwan gelin, ama layma siin kaadhki Aqoonsiga ee Ajaanbita,Ma ka faaidaystan karaa adeegyada caafimadka ee lacag la,aanta ah?

Hadii aadan is diiwan gelin ama aadan helin Kaadhki Aqoonisga ee Ajaanbita, keliya waxaad isticmaali kartaa hadii ay xalad deg degi ah timaado.Sida daraadeed si aad uga diktoonato waxkast oo ka celinay xadiidkaga helitaanka adeegyada caafimad,Waxaanu kugu dhiiri gelinaynaa inaad inad iska diiwan gelso codsigaga caalamiga ah goobaha dawlad ee DGMM sida ugu macquulsan .Intaas waxaa si dheer, Marka la eego shuruucda iyo qaawaninta ajaanibta ee ilaalinta caalamiga ah , Caruurta aan cidina wadin, dadka naafadda ah iyo dadka waweyn, dumarka uurka leh iyo hooyad kelida ahama aabaha keligi ah o wataa caruur, ama qofka lagula kacay xad gudubyo sida jidh dil, kufsi am xalado khatar ah oo maskixyan la xidhiidha, xad gudub jidh ahaaned ama xad gudub galmo ayaa loo aqoonsanyahay qof u baahan daryeel khaas ah. Sharcig wuxu si cad u sheegayaa in dadkan la siiyo mudnaan gaar oo heli tankooda xuquuqeed. Taas oo ay ku jirto adeegyo caafimaad.

Hadii ay adiga iyo qof kaleba arimahan aan kor ku sheegnay la soo kulanteen, fadlan, waxad noogu sheegtaa waraysigaga inta lagu guda jiro. Hadii aysan dhicin inad sheegto ama ay arinta kugu dhacdo ka dib waraysiga , waxad kaloo u sheegi kartaa haydaha dawlada iyo xarunta aad iska diiwan gelisay si arintada gaar loogu eego

Waxaan Turkey ku soo galay Pasapoor sax ah, waxaanan helay deganaansho wadanka ah, Sidoo kale ma ka faaidaysan kara caafimadka lacag la,aanta ah ee ay heli karaan dadka doonay ilaalinta caalamiga ah ?

Shuruudaha ugu waweyn ee deganaanshaha aad ku heli karta waxa ka mid ah inad leedahay caymis caafimaad kaas u ku eg muda lagu siiyey deganaanshaha wadanka. Hadaba dadka haysta deganaansha waa inay ku ekaadan caysmiskooda caafimadke marka ay muhim tahay. Sida daradeed suuragal ma ah in dadka haysta deganaansha saxda ah ee wadanka inay ka faaidaysan kara adeegyad caafimadka ee lacag la,aanta ah ee loogu tala galay dadka doonaya ilaalinta caalamiga ah.

Sidoo kale Sharciga u yaal ajaanibta iyo Ilaalinta caalamiga ah wuxu si cad u sheegayaa in laga goyn doono adeegyada la siiyiye dadka iyag leh caymiska caafimadka ama dhaqaale lagu bixiyeye daawayntooda isla marka ay bixin doonan dhamaan wixi dhaqaale ah ee laga bixiyey oo la xidhiidhay daawayntoodi.

Suuragal ma tahay inaan helo adeegyada caafimaad ee lacag la,aanta ah gobolada kale oo aan ahayn gobolka aan ku qoranahay?

Sharciga asaasiga ah wuxu dhigayaa inad keliya ka heli karto adeegyada caafimadka gobolka aad ku qoran tahay. Hadaba hadii aysan suuragal ahayn inad ka hesho adeegyada caafimad ee u baahan tahay gobolka ku qoran tahay,Waxaa lagu gudbin kara gobol kale, waxaa intas dheer hadi ay timaado xalaad deg deg ah oo cafimaad . waxaad si shurud la,aan ku heli karta adeegyad caafimaad.

Ma jiraan shurudo kale oo aan ogaan karaa?

Waxaa Muhiim ah inad haysato Kaadhka aqoonsiga ajaanibta kaas oo ka bilowda 99. Nambarkani wuxu xaqiijinayaa inad ogolansho ka haysato Hay,addaha ammniga ee dawlad ee lo yaqana (SGK). Sidan kor ku soo sheegnay Kaadhkaga aqoonisga wax lagu siin kara ka dib dhamaystirka waraysigaga ee hayaadaa dawlad ee loo yaqaan DGMM. Si kastaba ha

noqote, Hadii dawlad aysan ku ogolaan. Fadlan tag xafiiska DGMM oo ah meeshad iska diwan gelin karta sida ugu haboon.

Hadaba si aad uga faa'idaysto adeegyada caafimad ee ay cusbitalad bixiyaan, waxaad lagaga baahan yahay inad balan qabsato. Waxad balan ku samaysan karta nambarkan 182. Maalinta balanta waa inad hesha barcode nambar ka hore intaad la kulmin dhakhtarka. Sido kale waxa muhiim ah inad haysato waraaqihi codsigaga ee ilaalinta caalaamiga ee aqoonsiga marka aad dhakhtar la kulmayso.

Waa maxay baaxadda adeegyada caafimadka?

Waxaa ay bixiyaan adeegayo sare sare,labad iyo sadeexad hadii ay is keenaan hirgelinta SUT.Inkasto guud ahaan baaxad adeegyad caafimadka lo tixgeliyey si balaadhan. Xaaladaha caafimad ee aan ki miisanayn SUT ama ka badan xaddiga waxa laga yaaba in lacag dherad lagu bixiyo.

Af Turkiga kuma hadlo, Ma jiran adeegyo turjumaano oo la heli kara inta lagu guda jira adeegyad caafimadka?

Inkastoo ay haystaan turjumaano xaruumaha caafimadka qaybtood ee goboladu, hada adeegani waa gabaabsi am waa xadiidan yahay. Si kast ha noqote, waxad wici karta numberka 444 47 28 oo line lacag la,aan ah, waxaan hirgelisay Wasarada Caafimadka si lo helo adeeg turjumaano , sida Ingirisida, Faransiiska Farisga , carabida , Raasiyhanka iyo Jarmalka marka aad joogto cusbitalka ama farmasiyada.

Sido kale waxaanu idinku dhiiri gelinayna inaad balamo ka samaystaan cusbitalada la idin soo gudbiyey idinkoo wacay xaruntooda 182. Hadaba ma jiraan turjumaano idin caawinaya markaad wacaysan xaruntan 182 oo aad balanta ka qabsanaysaa. Hadaba markad wacaysan numberka waxaa muhiim ah idin haystaan qof af turkriga yaqaan oo idinka caawiyaa.

Xageeban ka heli kara daawoyinka?

Waxaad heli kartaan daawoyin lacag la,aan ah oo dhakhtarka idin qoran iyadoo lo eegayo xadiidka ay u asteeyeysay uruurka (SUT). Waxa suuragal ah in lagu yiraahdo bixi qayb, waxa sida kale suuragal ah in dawad lagu qoray iyo dawada lagu siiyo ay kala duwanadan xaga

qiimaha, ka dibna lagu yiraahdo bixi kala duwanansha qiimaha daawoyinka.

Daawada lagu so qoray waxaa noqon karta, mid internet lagu so geliyo iyo mid waraaq ahan lagugu so qoro. Hadaba hadii daawad alladda internetka lagu so geliyo, fadlan hubi inad haysato numberka daawadda, Hadise qoraal ahaan lagugu siiyo , waxa muhim ah inad haysto waraaqada marka aad u tegayso farmasiyad heshiska la leh. Is diiwan gelintu waa shuruudaha ugu horeeya ee isticmaalka is daawaynta. Fadlan sidoo kale hubsi inad sidato kaadhkaga Aqoonsiga ee ka bilaabanay 99. Ugu danbayntiina marka farmasiga u tegayso o dawada ka qaadanayso waa inad sida kale tusta waraaqaha cadaaymaha aqoonsigaga

Sidee baan u heli kara caawimad cudurada naafsiyanka iyo kuwa dhimirka?

Codsadaha Ilaalinta Caalamiga ah iyo ka faa'idaystaha waxaa lo ogol yahay inu helo caawimad dhinac caafimadka maskaxadda, Sidoo kale iyo adeegyada caafimadka ay bixiyaan hay'adaha dawliga ahi. Sido kale waxad u tegi karta Hay,aadaha uruurada Bulshada rayidka ah kuwaas oo bixiyaa adeegyada naafsiga bulshada . sido kale waaad na soo wici karta si aan ugu raadino cida bixisa adeegya naafsia ee bulshada gobolkaga.

Ma Jiran waxyaalo Khaas oo uu heli karo dhibanaha lagu xad gudbay ama xad gudbyo kale lo geystay ?

Sidan kor ku sheegnay , dadka lagula kacay xadgudubyo sida Jidh dil, Kufsi , xad gudub nafsiyan ah, ama xad gudub jidheedh ama xadugub galmo ayaa waxa lo aqoonsaday in la siiyo daryeel gaar ah si ay u helaan xuquuddoo adeegyada iyo nidaamka taas oo ay ku jirto helitanka adeegyada caafimadka.

Sharciyada iyo Qawaaninta Ajaanibta iyo ilaalinta caalamiga ah waxay si qota dheer u qeexayaan in la siin doono daawayn ku filan dadka lagula kacay xad gudbyada, sida kufsiga xadgudubyad galmada iyo am dhacdoyin xun xun ee ay la soo kulmeen ee ku soo noq noqota.

Laanta DGMM ee dawlad waxay leeyihin shaqaale cilmi nafsiga ah ama shaqaale arimaha bulshada ka shaqeeya kuwas oo ku caawin doona , ku siin doona warbixino iyo adeegyada la heli karo

Waa Maxay xuquuqdayda Bukaan ahaan ee Turkiga ?

Waxaad Xaq u leedahay inad hesho adeegyo caafimad adigoon lagu xaqirayn, in lagu sheego xaladad caafimaad iyo suurtaalnimad daawayntad , waxad xaq u leedahay in yeesho ama diido daawaynta sida sharciga ku ogol yahay. Xuquuqdada Sirta si ixitraam ahna in lagula macaamilo. Sido kale adiga ayaa iska leh go,aankaga ugu danbeeya ee daawayntada , waxad xaq u leedahay inad ka faaidaysto bilowga daawayntad iyo in lagu soo booqaan karo ama aad codsato inu qof ku raaco si aad u hesho amni iyo macaamil wanaagsan.

Hadi aad rumaysan tahay in xuduuqad bukaan la farageliyey, Waxad xaq u leedahay inad cabasho samayso oo meshay ku haboon tahay mariso. Inad hesho magdhow jidh ahaan iyo nafsiyad ahaanba dhawacyad ka soo gaadhay.

Si aad u dhamays tirto arintan, waxad hadli karta, qaybta xuquuqda bukaanka ee cusbitalka aad ka heshay daawaynta, hadii gud ahaan iyo gaar ahaanba aad dareensan tahay in cabashadad aan waxba laga qaban, Waxad xaq u leedahay inad gudbiso qoral cabasho ah uruurka xuquuqda bukaanka ee heer gobol ee qaybta caafimadka . Waxaa sidoo kale suuragal ah inad ka hadasho cabaashoyinkaga oo wacdo numberka 184 SABIM Hotline.(waa xarunta laga woco wasarad caafimadka. Laynkani waa leeyahay adeeg turjumaano.

Xuquuqda Qaxootiga ee Turkiga:

Meel kasta oo Turkiga aad ka joogtid, hadii aad rabto inad ka faaidaysto adeegyada xaga sharciga ah iyo la adeegyad la talinta. Ku soo dhowow inaad soo booqatid xafiiskeena ama nala soo xidhiidh tilifoonkyaga ama faxska dhamaan maalmaha asbuuca laga bilaabo 10:00bila 17:00 galabnimo. Dhamaan adeegyadadu waa bila lacag.

Dr. Refik Saydam Cad. Dilber Apt. No: 39 Daire: 11 Kat: 4

Şişhane, Beyoğlu - İstanbul

+90 212 292 48 30

+90 212 292 48 33

info@mhd.org.tr

Mülteci Hakları Merkezi

Refugee Rights Turkey

Dr. Refik Saydam Cad. Dilber Apt. No: 39 Daire: 11 Kat: 4

Şişhane, Beyoğlu - İstanbul

+90 212 292 48 30

+90 212 292 48 33

info@mhd.org.tr

www.mhd.org.tr

Xoogahan waxaa soo **saaray Hay,ada Xuquuqada Qaxootiga ee Turkiga** iyadoo la kaashanaysa hayada degan maraykane ee **Isku xidhka Midnimad qaxootiga** iyo **Golaha dhajka ee qaxootiga** oo ay tageerayso **Wasaarad Arimaha dibada maraykan, Maktabada shacabka, Qaxootiga iyo Socodaalka**

Refugee Rights Turkey

Refugee Solidarity Network

US Department of State
Bureau of Population, Refugees, and Migration